



March 21, 2025

Gacsiye Qoysaska Dugsiyada Degmada Magaalada Rochester,

Gu'aan, Dugsiga Degmada Magaalada Rochester waxay maamuli doontaa imtixaanada Gobalka New York ee Fasalada 3-8 Luqada Farshaxanka Ingiriisiga (ELA), xisaabta, iyo sayniska sida soo socdo.


Heerka Fasalka	Qiimeynta	Taariikhda Imtixaanada (maalinta koowaad khad madow)
5 iyo 8	Saynis (Ku saleysan kumbuyuutar)	Isniinta, April 7 – Jimcaha, April 11, 2025 <i>Iskool kasto waxoo doortaa 1 maalin 5 maalmood lagu qaado imtixanka.</i>
3 iyo 7	ELA (Ku saleysan warqad)	Talaadada, April 29 iyo Arbacada, April 30 Maalinta la qabto wixii dhaafay waa Arbacada, May 6, 2025
3 – 8	ELA (Ku saleysan kumbuyuutar)	Talaadada, April 29 – Talaadada, May 6, 2025 <i>Iskool kasto waxoo doortaa 2 maalmood 6 maalmood lagu qaado imtixanka.</i>
3 iyo 7	Xisaab (Ku saleysan warqad)	Arbacada, May 7 iyo Khamiista, May 8 Maalinta la qabto wixii dhaafay waa Arbacada, May 14, 2025
3 – 8	Xisaab (Ku saleysan kumbuyuutar)	Arbacada, May 7 – Khamiista, May 15, 2025 <i>Iskool kasto waxoo doortaa 2 maalmood 7 maalmood lagu qaado imtixanka.</i>

In ka badan toban sano, ardayda waxay qaadanaayeen qiimeynta imtixaanka sanadlaha ee NYS. Waxbarasho ahaan, waxay ka mid yihiin hal in ka badan imtixaanada qiimeynta sida wanaagsan ee dugsiyadeena iyo ardaydeena ula kulmaan heerarka fasalka ee heerka waxbarasho. Inkastoo aysan saameyn ku laheyn kaararka warbixinta darajada ama hadey ardayda u gudbeen heerka fasalka ku xigo, waxaa loo isticmaali karaa qalab ee macalimiinta ku bartaan koritaanka ardaygooda oo ku caawiyo see u qorsheeyaan waxbarashadooda.

Waa muhiim in la fahmo shuruudaha ka qaybgalka imtixaanka sida ku xusan Xeerka Guusha Arday kasto (ESSA), oo ah sharciga waxbarashada ugu weyn ee umada dhamaan dugsiyada dawlada. ESSA waxay u baahan tahay in gobol kasto oo qiimeeyo dhamaan ardayda dhigata ELA iyo xisaabta fasalada 3 – 8 sanad kasto iyo waxee la xisaabtamaan iskoolada side ardayda u guuleystaan. Sharciga waxoo sidoo kale u baahan yahay in 95% ardayda dhigato iskool kasto oo dawlad ah inee ka qeybqaataan qiimaynta imtixaanada NYS sanad kasto. Hadee iskoolada la kulmin shuruudaha ka qeybqaadashada, ma cadeyn karaan hormarka side sheegtay ESSA. Si kale hadii loo dhaho, iskool leh waxqabad tacliin oo wanaagsan waxoo heli karaa qiimeyn xun sababtoo ah heerka ka qeybgalkooda waxoo ka hooseeyaa 95%.

Hadaa qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan qiimeynta, fadlan la xiriir Maamulaha canugaaga. Markoo waqtiga imtixaanka imaado, waxaa ku dhiirigelinaynaa caruurtaada inee seexdaan hurdo fiican habeenkii see sifiican ugu diyaargaroobaan qiimeyntooda imtixaanka. Kaliya nastaan iyo sameeyaan sida ugu fiican!

Run ahaantii,

A handwritten signature in black ink, appearing to read "Dr. Demario Strickland".

Dr. Demario Strickland

Ku Xigeenka Kormeeraha Waxbarashada iyo Barashada